
# Warbixin waalid ROP

Carruurta horay u dhasha waxaa ku dhici kara cudurka loogu yeero ROP (prematuritetsretinopati) ee keena inay xididada indhaha ee ku yaal xuubka unugyadu araggu ku jiraan u koraan si aan caadi ahayn waxaana sidaas darteed baaritaan joogto ah ku sameeya dhakhtar indhaha ku takhasusay muddada hore markuu ilmuhu dhasho (murjuca yahay).

**Koritaanka isha ee caadiga ah** .

Xuubka aragga ee gudaha isha waxaa ku jira unugyada aragga kuwaas oo wada dareemaha aragga, kaas oo usii gudbiya miskaxda halkaas oo looga sii shaqeeyo oo lagu fasiro.

Xididada dhiigga xuubka aragga isha waxay bilaabaan inay koraan xilliga uurka dhex bartankiisa waxayna daboolaan xuubka aragga oo dhan markii la gaaro xilliguu ilmuhu bilo dhamaysto, taas oo ah qiyaastii 40 asbuuc markuu ilmuhu uurka ku jiray.



**ROP**

Markii ilmuhu horay u dhasho waxaa tashwiish ku imaanayaa koritaanka xididada dhiigga xuubka aragga mar kasta oo ilmuhu horay u dhasho waxaa kordhaya halista koritaanka xididada aan caadiga ahayn, taasoo keeni karta ROP. Waxyaalaha ugu muhiimsan ee keena ROP waa uurka ilmuhu wakhtigiisa ka hor dhasho, ilmaha oo ogsijiin lagu daaweeyo iyo koritaanka ilmaha oo aan fiicnayn asbuucyada noloshiisa u horreeya.

ROP waxaa loo qaybiyaa dhowr marxaladood kan ugu daran wuxuu keeni karaa dhiigid iyo nabarro haaro ah oo ka dhasha, taas oo keeni karta in xuubka aragga isha isku soo ururo. Nooca daran ee ROP waxaa soo fuqi kara xuubka aragga wuxuuna keeni karaa aragga oo xumaada.



Qiyaastii tobankii ilmoodba afar ka mid ah ilmaha Iswiidhan ku dhasha ka hor asbuuca 30 ee uurka ayuu ku dhacaa nooc ka mid ah ROP. Inta badan isbeddalada ROP si kadis ah ayay iskaga baaba'aan ayagoo aan dhib ka tagin, ama ha noqdo dhib ku yimaada xuubka aragga ama aragga. Ilmaha qaarkood (qiyaastii 8%) cudurka ku dhaca xuubka aragga wuu kasii daraa oo wuxuu noqdaa nooca daran ee ROP, kaasoo u baahan daawayn looga hortago in xuubka araggu soo fuqo iyo aragga oo mustaqbalka xumaada.

**Daawayn**

Laysar ku daawaynta ayaa ah nooca daawaynta caadiyan lagu daaweeyo waxaana loo sameeyaa si loo joojiyo koritaanka aan caadiga ahayn ee xididada dhiigga ku jira qaybta bannaanka soo xigta ee xuubka aragga isha waxaana badanaa lagu sameeyaa qofka oo la suuxiyay. Inta badan daawayntu waxay leedahay waxtar fiican waana dhif iyo naadir inuu ilmuhu indho beelo ROP dartiis. Xaaladaha qaarkood waxaa sidaas oo ay tahay loo baahan karaa laysar ku daawayn dhowr jeer ah mararka qaarkoodna waxaa la isticmaalaa daawayn nooc kale ah oo daawo (Anti-VEGF) lagu shubo isha gudaheeda iyadoo qofka la suuxiyay. Xattaa daawayntaan waxay dejisaa koritaanka aan caadiga ahayn ee xididada dhiigga oo waxayna yaraynasaa halista soo fuqidda xuubka aragga.

**Baaritaano indhaha**

Si loo ogaado carruurta u baahan in laga daaweeyo ROP, waxaa Iswiidhan baaritaano lagu sameeyaa indhaha dhammaan carruurta dhasha ka hor asbuuca 30 ee uurka.

Baaritaanka u horreeya waxaa la sameeyaa markii ilmuhu da'da 1-2 bilood jiraan kaddib baaritaanadu way sii socdaan iyagoo 1-2 asbuuc u dhexeeyaan illaa xuubka aragga ay daboolaan xididada dhiigga, taas oo badanaa dhacda markii ilmuhu wakhtigiisa dhamaysto oo uu gaaro da' u dhiganta asbuuca 40aad ee uurka.

Baaritaanka waxaa ilmaha lagu shubayaa dhibcaha indhaha ee wayneeya bu'da isha. Dhakhtarka indhaha ayaa kaddib ku eegaya nal iyo waynayso isha lagu qabanayo. Kaamirad ayaa loo isticmaalayaa baaritaanka iyo sawirka isha laga qaadayo.

Markii baaritaanka la samaynayo waa in isha la kala qaado taasna waxaa caadiyan fududeeya in ilmuhu uu isdebciyo markii mujuruc uu nuugayo, naaska nuugayo ama sonkor la qasay la siiyo. Markii baaritaanka kaamirada la samaynayo waxaa ilmaha indhaha looga shubaa dhibco kabaabyo ah.





Kontoroolka indhaha waa lasoo gabogabeeyaa markii lagu qiimeeyo in koritaanka xididadu uu joogsamay, ama ilmaha ha la daaweeyo ama yaan la daawayn. Haddii ROP uusan dib u noqon oo koritaanka xididada aysan joogsamin oo ilmahaagu u wareego qayb kale ama isbitaal kale, waa muhiim in laga sii wado baaritaanka indhaha qaybta cusub ama isbitaalka qaybta indhaha ee ilmahaagu ka tirsan yahay.

**La socosho**

Carruurta laga daaweeyay ROP waxaa kontorool loogu sameeyaa si joogto ah muddada ay soo korayaan.

Xattaa carruurta dhashay ka hor asbuuca 28 ee uurka, ama haddii uu kugu dhacay ROP ama uusan kugu dhicin, waxaa lagu la socon doonaa isbitaalka qaybta indhaha markay 2,5 sano jiraan iyo markay da'da 6,5 sano jiraan maadaama halista ay ugu jiraan inay weershe (cawarnaan) noqdaan ay kordhayso baahida ay ookiyaale u qabaana kordhayso.

Haddii aad ka shakisan tahay in ilmahaagu weershe yahay ama cillad kale aragga ka haysato, waa muhiim inaad la xiriirtid isbitaalka qaybta indhaha ee ilmahaagu ka tirsan yahay.

**Diiwaanka tayada ee ROP (SWEDROP)**

Si loo hagaajiyo tayada daryeelka caafimaadka waxaan ku uruurinaynaa xogta ku saabsan baaritaanka indhaha ee ilmahaaga diiwaan tayo hubin oo loogu talo galay ROP (SWEDROP), oo ah diiwaan ka garab socda diiwaanka qaybta dhallaanka horay u dhasha ee SNQ.

Ilmahaagu wuxuu xaq u leeyahay in laga daayo in diiwaanka la geliyo. Ilmahaagu wuxuu sidoo kale xaq u leeyahay in xogtiisa laga tirtiro diiwaanka. La xiriir markaas qaybaha isbitaalka ee ilmahaaga lagu daaweynayo ama lagu daaweeyay oo ku wargeli marka soo socota oo aad booqanaysid qaybta isbitaalka.

Wixii warbixin intaas dheer oo ku saabsan **xogta iyo sir xajinta, foomka lagu codsado in xogta qofka laga diiwaangeliyay loo soo saaro** iyo sidoo kale **foomka lagu diidayo**, arag warbixinta waalidiinta loogu talo galay ee ku jirta bogga SWEDROP's ee aad ka helaysid linkiga kugu xiraya diiwaanka ilmaha horay u dhasha (Neonatalregistret SNQ).